Booqashada *Växa tryggt* (Amni ku kor)

1. 1–2 toddobaad, kalkaalisada caafimaadka iyo umulisada ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta.

2. 3–4 toddobaad, kalkaalisada caafimaadka iyo taageeraha waalidiinta ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta.

3. 4 bilood, kalkaalisada caafimaadka iyo taageeraha waalidiinta ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta.

4. 8 bilood, kalkaalisada caafimaadka iyo taageeraha waalidiinta/macalin.

5. 10 bilood, kalkaalisada caafimaadka iyo taageeraha waalidiinta ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta.

6. 15 bilood, kalkaalisada caafimaadka iyo taageeraha waalidiinta ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta

Växa tryggt

Isku duwidda taageerada waalidiinta



Farshaxanka: Veronica Carlström

Växa tryggt – Isku duwidda taageerada waalidiinta waa barnaamij booqasho guri oo la fidiyay oona laga heli doono gobolka Skåne. Taasoo macnehedu tahay in booqashooyinka rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta qaarkood, lagu dhaqaaqi doono iyadoo qoysaska guryahooda lagu booqdo. Booqashooyinka waxay suurtagelin doonaan in kalkaalisada caafimaadka rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta wadajir umulisada, taageeraha waalidiinta iyo macalin/bare oo ah dadka sanadka ugu horeeyo ugu muhimsan ilmaha iyo waalidiinta cusub. Markii la idin booqan doono waxaad heli doontaan fursad, aad nalaga arrinsantaan arrimaha anaga muhimka noo ah. Tan kale, waxaan rabnaa inaan ka wada hadalno arrimaha qaarkood, sida ubadkiina aad isku baran lahaydeen, ahaanshada qoys iyo hirgelinta wadajirka nolol-maalmeedka.

Markii aan si wadajir ah u kulanno, waxaanu suurtagelin doonaa yeelashada xiriir wanaagsan iyadoo isla markaana aan heli doono fursad aan ku barano ubadkiinna iyo qoyskiinna. Xaaladdaas waxaan idin siin doonaa talo iyo taageero oo laga yaabo in idinka gaar ahaan u baahan tihiin.

Is-dejiya!
Maadaama aan ogsoon nahay in dhowaan in u ubad idin dhashay, ma idinka filanayno in shaah/qaxwo nagu casuuntaan ama guri si fiican loo nadiifiyay.



Wixii su` aallo ah waxaad kala xiriiri kartaan

Umulisada _____

Kalkaalisada caafimaadka ee rugta
daryeel-caafimaadeedka carruurta _____

Taageeraha waalidiinta _____

Macalin/bare _____

Haddii suurtagal ay noqon karto waxaan rabnaa in xilliga booqashooyinka aan la kulano labada waalid ee cunugga.

